

SAN DIEGO UNIFIED SCHOOL DISTRICT
Office of the Deputy Superintendent

Warbixin loogyu talagalay Waalidiinta ama Dadka Masuulka ka ah Ardeyda Heerarka Fasalada 6-8 ee Halista ugu jira inay keeni waayaan heerarka buundooyinkii looga baahnaa

Dugsi kasta oo degmada ku yaal wuxuu la shaqeyaa carruurta, waalidiinta iyo dadka ardeyda masuulka ka ah si ay uga caawiyaan inay ardeydu waxbarashadda ku guuleystaan oo gaadhaan buundooyinka heerka fasalka looga baahan yahay ama ka sarreeyaan. Bilowgii sannadkan, waxaa loo arkey inuu ilmahaagu **halis** ugu jiro inuu buundooyinka heerka fasalka ee looga baahan yahay gaadhi waayo. Sidaas darteed, macallinku wuxuu sameeyey Heshiis Waxbarasho oo ay ka mid yihiin barnaamijyo uu macallinku ku talineyo in ardeyga lagu taageero si uu waxbarashadda ugu guuleysto. Heshiiskaas Waxbarasho wuxuu kaloo dhigeysaa waxyaabaha macquulka ah ee ardeygu la kulmeyo haddii uu dhammaadka sannad-dugsiyeedka gaadhi waayo heerka buundooyinka looga baahan yahay—waxaana ka mid ah in lagu celiyo heerka fasalka uu hada ku jiro.

Dhammaadka sannad-dugsiyeedka, macallinka ilmahaaga wax u dhiga wuxuu dib-u-qiimeyn ku sameyn doonaa heerka waxbarashadda ee ardeyga, kedibna wuxuu natiijooyinka qiimeyntaas go'aan kaga gaadhi doonaa inuu ardeygu buuxiyey shuruudihii uu ku gudbi lahaa. Foomka Go'aanka Macallinka ee ah in ardeyda la Gudbiyo ama lagu Celiyo fasalka uu hada ku jiro wuxuu ka warbixneyaa go'aanka macallinka ee ku saabsan in ilmahaaga yahay mid:

- Ka sareeya/ku eg/ku dhaw heerka fasalka, loona gudbin doono heerka fasalka ku xiga;
- Ka hooseeya heerka fasalka ama aad uga hooseeya heerka fasalka, laakiin loo gudbin doono heerka fasalka xiga iyadoo taageero dheeraad ah lagu siineyo heerka fasalka uu u gudbey;
- Aad uga hooseeya heerka fasalka waxaana lagu celineyaa heerka fasalka uu hada ku jiro.

Dikuumentigan waxaa weheliya, natiijooyinka imtixaanka ee uu macallinka ilmahaaga go'aanka ku gaadhey iyo weliba sannadka soo socda taageerada iyo dhexgelista waxbarasho ee uu ilmahaagu u baahan yahay. Dhibcaha iyo heerarka qiimeyntaas waxaa lagu sharaxay jaantuskan hoos ku qoran.

Go'aanka ah in ardeyga la gudbiyo ama fasalka uu hada ku jiro lagu celiyo si taxadar leh ayaa loo sameeyey; hase ahaatee, haddii aadan go'aankaas ku qanacsaneyn, waxaad racfaan ama abiil u gudbisaa maamulha dugsiga. Shir ayaa la idin qaban doona adiga, ilmahaaga si aad ula kulantaan maamulaha iyo macallinka oo dib loogo eego go'aankii ku saabsanaa in ardeyga fasalka lagu celiyo. Shirkaas kedib, macallinka ayaa go'aanka kama dambeysta ah gaadhi doona, kaas oo ah in ilmaha la gudbiyo ama fasalka uu hada ku jiro lagu celiyo, wakhti gaaban kedibna qoraal ogeysiin ah ayaa lagu soo diri doonaa.

S H A R A X A A D A D H I B C A H A

Qiimeynta	Waa maxay macnaha dhibcuhu...
Lafagurista Waxa La Akhrineyo (ARI)	Waxay tusineysaa faraqa u dhexeeya heerka akhriska ardeyga iyo heerka fasalka laga rajeynayo wakhtiga imtixaanka.
Awooda Heerka Akhriska (DRP)	Waxay tusineysaa xidhiidhka u dhexeeya dhibcaha iyo heerka fasalka laga rajeynayo wakhtiga imtixaanka.
Imtixaanka Horumarinta af Ingiriisiga ee CA (CELDT, kuwa af Ingiriisiga baraneya)	Waxay tusineysaa Miisaanka Dhibcaha, taas oo ka timaada tirada jawaabaha saxda ah. Miisaanka imtixaanka CELDT wuxuu u dhexeeya 220 – 710 (Fasalada X – 1aad), iyo 265 – 692 (Fasalada 2aad – 12aad)
Imtixaanka u Diyaargarowga Aljibrada (MDTP)	Waxay tusineysaa Dhibcaha Dhabta ah, taas oo ah tirada jawaabaha saxda ah.
Imtixaanka Aljibrada ee Koorsada ugu dambaysa	

S H A R A X A A D A H E E R A R K A

Qiimeynta	Waa maxay macnaha Heerku...
ARI, DRP, MDTP, Koorsada ugu dambaysa imtixaanka Aljibrada	AAC= Heerkii Ka Sareeya/Ku eg/Ku dhaw
	B = Ka Hooseeya Heerka Fasalka
	FB = Aad uga Hooseeya Heerka Fasalka
CELDT (Guud ahaan Heerka Aqoonta af Ingiriisiga laga marayo)	B = Bilow ah
	EI = Bilowga Dhexe
	I = Dhexe
	EA = Bilowga Sare
	A = Sare

Somali version: Attach 4a_Parent Info_ML_Spring07